# Suuxinta qeyb ka mid ah jirka ee loogu talagalay qalliinka dhalmada

## Cirbada suuxinta ee dhabarka (spinal) iyo cirbada xanuun baabi'iyaha ee dhabarka (epidural)

the women's
the royal women's hospital

## Waa maxay waxa loo yaqaan regional anaesthetic?

Regional anaesthetic waa daawo ka xannibaysa xanuunka qayb gaar ah oo jidhkaaga ah.

Marka aad galayso qalliinka dhalmada, waxay kuu ogolaaneysaa inaad soo jeedo inta aad ka dhalyso adoon wax xanuun ah dareemin. Tani waa ay ka duwan tahay suuxinta guud (general anaesthetic), taas oo ku suuxinaysa marka lagu qalayo.

Suuxinta qeyb ka mid ah jirka la suuxinayo (regional anaesthtic) waxaa loo bixin karaa 2 qaab:

- iyadoo hal cirbad oo lagaaga duro lafaha dhabarka dhexdooda – taasi waa lafta dhabarka cirbad suuxin marka lagu duro
- iyadoo laguu soo dhex marinayo tubo yar oo balaastiik ah oo galaysa dharkaaga- tani waa cirbada loo yaqaan epidural ee suuxinta.

Labada noocba waxay xannibaan farriimaha xanuunka ee dareemayaashaada.

Waxaad dareen la'aan ka noqon doontaa inta ka hooseysa laabtaada oo ma awoodi doontid inaad dhaqaajiso lugahaaga.

Suuxinta qeyb ka mid ah jirka ah waa qaabka ugu badan ee dumarka loo suuxiyo markay galayaan qalliinka dhalmada.

## Waa maxay faa'iidooyinka kujira?

Marka loo barbar dhigo suuxinta guud, suuxinta la suuxinayo qeyb jirka ah:

- waa mid caafiyan aysan wax dhibaato ah ka imaan
- wuxuu kuu ogolaanaysaa inaad soo jeeddo marka ilmahaagu dhasho
- waxaa laga helaa dhowr saacadood oo xanuun la'aan ah qalliinka ka dib; haddii morphine lagu daro, xanuun baabi'yuhu wuxuu sii shaqeyn karaa ilaa 24 saacadood
- kaama dhigayso qof aad u daciif ah
- waxay kuu sahleysaa inaad qabato aadna quudiso ilmahaaga waxyar ka dib markaad dhasho.
- inta badan waxay u ogolaataa lamaanahaaga ama qofka taageerada ku siinaya inay kula joogaan intaad ka dhaleyso, taas oo aan suurtogal ahayn marka lagu wada suuxiyo.

## Maxay yihiin dhibaatooyinka ama khatarta ka dhalan karta?

Markii qofka lagu duro cirbad qeyb gooni ah oo jirka ka mid ah kaliya suuxinaysa:

- waxaa laga yaabaa inaad dareentid xoogaa dhaqdhaqaaq ah, in wax la jiidayo, iyo cadaadis aad ka dareemayso caloosha inta lagu qalayo, laakiin ma dareemaysid wax xanuun ah
- waxaa laga yaabaa inaysan lugahaaga wax dareen ah yeelan ama aadan xataa dhaqaajin Karin 2 ilaa 4 saacadood cirbada ka dib.

Cirbada suuxisa qeyb gooni ah oo jirka ka mid ah waxay keeni kartaa dhibaatooyin kale ama khataro. Haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadaha hoos ku taxan marka aad qaadato cirbada suuxinta ka dib ama aad welwel ka qabto caafimaadkaaga, la hadal dhakhtarka ku suuxiyay ama umulisadaada.

Dhibaatooyinka badanaa la arko waxaa ka mid ah:

- Hoos u dhac ku yimaada cadaadiska dhiigga. Taasi waxay keeni kartaa inaad dareento wareer, madax-qafiif, ama sidii qof xanuunsan oo kale. Waxay taasi ku dhacdaa 2-dii qofba 1 qof oo ka mid ah dadka qaadanaya cirbada suuxinta ee dhabarka xanuun ay kala kulmeen cirbada suuxinta iyo 20-kii qofba 1 ka mid ah ee xanuun kala kulma cirbadaepidural-ka.
- Gariir ama cuncun ayay la kulmi karaan 20-kii qofba 1 ka mid ah.
- Qofka qaata cirbada epidural-ka, 8 ilaa 10-kii qofba 1 qof oo ka mid ah ayaa u baahan kara in caadi loo wada suuxiyo ama in tuubada dhabarka looga muday la eego amaba la badelo.

Madax-xanuunku maaha wax badana ay dadka la kulmaan oo wuxuu saameeyaa 100-kii qofba 1 ka mid ah ee qaatay cirbadaepidural-kaiyo 200 qofoodba 1 ka mid ah ee qabadhabar-xanuunkal.

Dhibaatooyinka aadka dhifka u ah waxaa ka mid ah:

- Dhaawac ku yimaada neerfaha (sida kabuubyo ama daciifnimo lugta ama cagaha), caabuqa laf-dhabarka ama qoorgooyaha, iyo in daawada wax suuxisa ay si lama filaan ah jirka ugu faafto (haddii wax badan ay galaan xididka laf dhabarta).

Dhaawac aad u daran ama in qofku cuuryaan noqdo waa wax dhif ah.

## Sidee loo bixiyaa?

Takhtarka wax suuxiya ayaa ku siin doona daawada suuxinaysa jirka qeyb ka mid ah.

Tuubo yar oo balaastiig ah (cannula) ayaa la gelin doonaa xididka gacantaada ama cududda, waxaana faleenbo lagu siin doonaa dareere. Cadaadiska dhiiggaaga iyo garaaca wadnahaaga waa lala socon doonaa.

Waxaa lagaa caawin doonaa inaad jirkaaga ka dhigto sida la rabo inaad ka dhigto, waad soo fadhiisan doontaa ama hal dhinac baad u jiifan doontaa, si ay kaaga caawiso inaad jidhkaaga u leexiso ilmahaaga.

Dhabarkaaga hoose waxaa lagu nadiifin doonaa daawada jeermiska disha.

Takhtarka suuxinta ayaa dareemi doona lafaha dhabarkaaga. Waxay maqaarkaaga ku duri doonaan cirbada suuxinta, taasoo meesha ka dhigi doonta meel aan waxba dareemayn.

Waxaad dhabarka ka dareemi doontaa dareen ah in lagu riixayo oo kale marka cirbada laguugu durayo. Inaadan is nuuxin waxay ka caawinaysaa howlaha qalliinka inay si fudud u qabsoomaan waxayna yareyn kartaa waxyeelooyinka gadaal ka imaan kara.

- Marka laga hadlayo cirbadaepidural-ka, tuubo yar oo balaastiig ah ayaa dhabarkaaga la gelin doonaa. Taasi waxay kuu sahlaysaa in lagu siiyo daawo dheeraad ah oo suuxinta ah hadii loo baahdo.
- Marka laga hadlayo cirbada suuxinta ee dhabarka, hal duris oo daawada suuxinta ayaa laguugu duri doonaa. Waxay jirkaaga kusii jiraysa inta uu qalliinka socdo ee aad ka dhalyso ilmahaaga oo dhan

Cirbada ayaa lagaa saari doonaa, dhabarkaaga ayaana laguu dhigi doonaa, adoo wax yar u janjeera dhanka bidix.

Daawada suuxinta waxay bilaabi doontaa inay shaqeyso 5 iyo 20 daqiiqo gudahood. Qalliinka intaan la bilaabin kahor, takhtarka suuxinta ayaa hubin doona in jirkaagu dareenka ka tagay, badanaa waxay saas sameeyaan ayagoo isticmaalaya baraf.

Takhtarka suuxinta ayaa kula joogi doona qalliinka inta uu socdo oo dhan si uu u hubiyo in xaaladaadu fiican tahay.

## Maxay yihiin fursadaha kale ee suuxinta ee kuu furan?

Haddii lagugu duray cirbada xanuunka ee epiduralka ah intaad foolanaysay, waxaa daawada suuxinta laguugu siin karaa tuubada laguugu siiyay daawada dhabar xanuunka ee epidural-ka.

Taasina waxay ku siinaysaa in la mid ah xanuun baabi'iyaha aad ka hesho daawada suuxinta ee dhabarka. Wixii macluumaad dheeraad ah, akhri xaashida xaqiiqda xanuun baabi'iyaha epidural-ka ee loogu talagalay foosha.

Waxaad kaloo qaadan kartaa daawada suuxinta guud, taas oo macnaheedu yahay inaad seexan doonto ilaa inta aad ka dhaleyso. Haddii aad qaadato daawada suuxinta guud, lammaanahaaga ama qofka ku taageeraya kulama joogi karaan qolka qalliinka, waxaana laga yaabaa in nuunaha aad dhashay oo soo baxo asagoo hurdeysan daawada suuxinta owgeed.

## Wixii macluumaad dheeraad ah

Waxaad dhakhtarka ku suuxinaya weydiin kartaa su'aalaha ku saabsan suuxinta jirka qeyb ka mid ah la suuxinayo ama waxaad kala hadli kartaa fursadaha kuu furan maalinta qalliinka.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad waydiiso su'aalo ama inaad kala hadasho fursadahaaga ka hor maalinta qaliinka, u sheeg dhakhtaradaada ama umulisadaada. Waxay kuu qorsheyn karaan inaad la hadasho takhtarka suuxinta.

**Adeegga Xanuunka Ba'an,**
**Isbitaalka Haweenka ee Royal**

Isniinta ilaa Jimcaha 8-da subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo
Taleefanka: (03) 8345 2389

## Ma u baahan tahay turjubaan?

Interpreter

Waad codsan kartaa turjubaan haddii aad u baahan tahay turjubaan.

## Taageerada Rabshadaha Qoyska

**1800 Respect National Helpline (Xushmada Khadka Caawinta Qaranka)**

Waxaad heli kartaa caawimo haddii aad la kulantay xadgudub galmo, rabshad guri ama qoys iyo xadgudub.
Waxaad wici kartaa xilli kasta oo habeen iyo maalinba ah.
1800 737 732 1800respect.org.au

**Cudurdaar:** Xaashidan xaqiiqda waxa ku qoran waa macluumaad guud oo keliya. Wixii talooyin adiga kuu gaar ah ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ama tan ilmahaaga, waa inaad talo ka raadsataa dhakhtarkaaga. Royal Women's Hospital masuul kama aha khasaare ama dhaawac ka dhasha ku tiirsanaanta aad ku tiirsan tahay xaashidan halkii aad kala kulmi lahayd dhakhtar. Haddii adiga ama ilmahaaga aad u baahan tihiin daryeel caafimaad oo degdeg ah, fadlan la xidhiidh waaxda gurmadka degdegga ah ee kuugu dhow.
© The Royal Women's Hospital 2025.